IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية لصومال الديمقراطية

Sannadka 5aad — *Muqdisho, 22 Jan. 1977, L. 1 R 1*

Laanta Faafin Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

**FAAFIN BIL SOO BAXA** — جريدة شهرية

**OIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## K O O B N I I N

## BOGGA KOOWAAD

W. M.

---

## B O G G A  L A B A A D

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 6 Jannaayo 1977, *Magacaabid Sarkaal loo wakaashay kharashka Miisaaniyadda Sannadka 1977 L. 6* — Bogga 35

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 13 Jannaayo 1977, *Magacaabid Guddiga gaarka ah ee arrimaha Badda ee Madaxtooyada J.D.S. L. 7* — » 36

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD 18.9.1976, *Dhul dawladeed la siiyey, ganactana loo geliyey Jaalle Cabdullaahi Maxamuud Xasan ku yaal degmada Kismaayo kuna fadhiya mq. 810 L. 8* — » 37

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD 14.11.1976, *Ansaxid kala gadasho Daar labo Dabaq ah kuna taalla Magaalada Marka Gobolka Shabeelaha Hoose, oo ay gadatay Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta kuna fadhiya mq. 1688,10 L. 9* — » 39

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

XEER WASAARADDA HAWALHA GUUD 9.12.1976,
*Dhul Dawladeed la siiyey gacantana loo geliyey Jaallayacsha Cali Aadan Xasan iyo Daahir Xaaji Maxamed ku yaal muqdisho Xaafadda Hodan kuna fadhiya mq. 364,50 L. 10* » 41

**BOGGA SADDEXAAD**

**TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.**

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 22.11.76,
*Naado Dhul Jaalle Maxamed Cabdullaahi Maxamed L. 5* » 43

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 22.11.76,
*Naada Dhul Jaalle Seynab Maxamed Yeberow L. 6* » 44

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 22.11.76;
*Naada Dhul Jaalle Aamina Aadan Nuur L. 7* » 45

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 22.11.76,
*Naada Dhul Jaalle Ibrahim Maxamuud Maxamed iyo Faarax Ciise Cabdulle L. 8* » 46

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 22.11.76,
*Naada Dhul Jaalle Awliya Maxamed Xersi L. 9* » 47

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 22.11.76,
*Naada Dhul Jaalle Xersiya Seraar Yuusuf L. 10* » 49

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 19.12.76,
*Naada Dhul Jaalle Axmad Maxamed Abiikar L. 11* » 50

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 19.12.76,
*Naada Dhul Jaalle Cabdulle Wagad Shiil L. 12* » 51

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 19.12.76,
*Naada Dhul Jaalle Cali Weheliye Siyaad L. 13* » 52

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 19.12.76,
*Naada Dhul Jaalle Caasha Cali Maxamed L. 14* » 53

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 19.12.76,
*Naada Dhul Jaalle Xasan Xersi Muuse L. 15* » 54

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 19.12.76,
*Naada Dhul Jaalle Maxamed Aadan Sabriye L.16* » 55

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 19.12.76,
*Naada Dhul Jaalle Sheekh Yuusuf Faarax Cabdulle L. 17* » 57



WASAARADDA HAWLAHA GUUD 19.12.76,
*Beddelaad Naada Dhul Maxamed Cali Jimcaale L.18* » 58

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 14.12.76,
*Beddelaad Naada Dhul Hirawe L.19* » 48

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 4.1.76,
*Beddelaad Naada Dhul Faarax Ciise Aadan L. 20* » 58

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 11.1.77, *Lumid jeegga wareega L. 11239 ku qoran Sh. SO. 3.834 uu leeyahay Xasan Axmed Nuur L. 21* » 59

MAXKAMADDA GOBOLAK BANAADIR 11.1.1977,
*Lumid jeegga wareega L. 8862 ku qoran Sh. SO.* 2.114 uu leeyahay Maxamed Cali Sasiid L. 22 » 60

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 15.1.1977,
*Lumid buugga kaydka L. 10551 ku qoran Sh. SO. 2.348 uu leeyahay Colow Geedi Maxamed L. 23* » 61

MAXKAMADDA GOBOLKA HIIRAAN 19.12.76, *lumidda jeegga wareega L. 24317 ku qoran Sh. SO. 5.000, uu leeyahay Xaaji Xaxamed Cabdalla L. 23/Bis* » 62

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 22.1.1977,
*Lumid buugga kaydka L. 8101 Sh. SO. 16.5.80 uu leeyahay Maxamuud Maxamed Xasan* » 25/bis

**BOGGA XISBIGA HANTIWADAGGA KACAANKA SOOMAALIYEED**

GO'AANNO XEERAR IYO AWAAMIIR

GO'AANNO XEERAR IYO AWAAMIIR

# BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAMA J.D.S. ee 6 Jannaayo 1977, Magacaabid Sarkaal loo wakiishay Kharashka Miisaaniyadda sannadka 1977,

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ANNAGOO ARGNAY: Xaashidii koowaad iyo tii 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga Lam. 1 ee 21.10.1969,

MARKAAN ARKAY: Dikreetada sharciga ee soo baxday 29kii Disember 1961, Lam. 2, Amarka maamulka Xisaabaadka;

MARKAAN ARKAY: P.D.R. 20 Maarso 1965, L. 13 Xeeka nidaamitna iyo abaabulidda xeerka joogtada ah ee ku saabsanaa Madaxtooyadii hore ee guddiga Wasaaradda Xafiisyada la xiriira iyo wixii beddelaad gashay.

MARKII LA GARAYSTAY: In loo baahan yahay sarkaal shaqaale ee loo wakiisha maamulka lacagta Madaxtooyada J.D.S. iyo dhammaan xubnaha kala duwan ee raacsan: Agaasimayaasha Guud — Xafiisyada, iyo qaymaha maamulka ee lagu tilmaamay sharciga lambarkiisu ahaa 1 taariikhdiisuna ahayd 4.1.1968, iyadoo uu siinayo awood maamulidda qardaysiga ku tala gelidda kharashka shaqa socodsiinta, iskuduwidda iyo soo bandhigidda xisaabaadka la garaysan karo una saabsan qaradada (soo hormarin) la sameeyo, oggolaashada rukhsada safarka dibedda iyo Gudaha.

DEKEREETA:

Qodobka 1aad

Sarkaalka la yiraahdo Jaalle Darmaan Cali Ibraahim — Darejo A|6 — P.N.1-0001 waxaa lagu magacaabay Agaasimaha Guud ee Lacagta, ku meel gaarka ah, MJDS, waxaa kaloo awood loo siiyey inuu ahaado wakiil kharajka Miisaaniyadda sannadka 1977 ee lacagta MJDS iyo xubnaha raacsan ee kor lagu xusay, ka billaabata 1 Jannaayo 1977,

Dikereetadatanu waxay dhaqan gelaysaa haddatar, isla markaan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 6 Jannaayo 1977

Jamhuuriyadda Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY**
**Diiwaanka Lam. 1 Bogga Lam. 78**
**Muqdisho, 8 Jannaayo 1977**
**Hantidhawrèa Guud**
**G/Sare Cabdullaahi Warsame Nffir**



XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 13 Jannaayo 1977, Magacaabid Guddiga gaarka ah ee Arrimaha Badda ee Madaxtooyada J.D.S, L. 7

M A D A X W E Y N A H A

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah; 17, 18, iyo 19 ee 1.7.1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga L. 6 ee 5.1.1977, oo lagu dhisay Guddiga gaarka ah ee ka talisa arrimaha Badaha;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la magacaabo Xubnaha Guddiga Gaarka ah ee Arrimaha Badda si hawsha Sharcigaasu tilmaamayo loo fuliyo lana hirgeliyo;

WUXUU XEEREEYEY

Qodobka 1aad

MGAABIDDA GUDDIGA

Jaallayaasha hoos magacyadoodu ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay inay ka mid noqdaan Xubnaha Guddiga Gaarka ah ee Arrimaha Badda M.J.D.S:

1. Jaalle S/Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf Wasaaradda Gaashaandhigga — Guddoomiye
2. Jaalle Garsoore Yuusuf Cilmi Rooble Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta — Guddoomiye Ku—xigeen
3. Jaalle Qareen Cabdiraxmaan Sheekh Maxamed Wakaaladda Gaadiidka Badda — Xubin
4. Prof. Cabdilqawi Axmed Yuucuf Barre Jaamacadda Ummadda — Xubin
5. Cabdiraxmaan xuseen Maxamuud Wasaaradda Arrimaha Dibeoda — Xubin
6. Jaalle Inj. Hilaal Cabdalla Faraj Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha — Xubin
7. Jaalle Muriiddi Cali Saalax Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda — Xubin
8. Jaalle Jihaad Axmed Ciise Maxkamadda Badbaadada Dalka — Xubin

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Jmahuuriyadda Dimuqraaciga Soomaaliya.

Muqdisho, 13.1.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 18 SET. 1976 Dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey Jaalle Cabdullaahi Maxamuud Xasan ku yaal Degmada Kismaayo kuna faahiya mq. 810. L. 8

WASAARAADDA HAWLAHA GUUD

AWAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

ISAGOO ARKAY: Warqaddii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka iyo Xeerka Lam. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Lam. 50 soona baxay 26 Jannaayo 1964;

ISGAOO ARKAY: Arjigii uu keensaday Cabdullaahi Maxamuud Xasan taariikhdu markay ahayd 10.9.1969 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed, ku yaal Degmada Kismaayo;

ISAGOO ARKAY: Naadada Dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhejiyey looxa Dawladaa hoose ee Degmada Kismaayo, laguna qoray faafinta rasmiga ah ee dawladda, L.1 R. 9 soona baxay 11 setember 1974, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda Lam. eber, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horey u aqoonsadeen Guddiga dhismaha ee Dawladda kana tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud Waaxda farsamada dhulka taariikhdeeduna ahayd 1 setember 1974, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada Lam. 169178 ee 1.9.1974 kana soo baxday Fafiiska canshuurta dadban, taas oo caddaneysa in Cabdullaahi Maxamuud Xasan uu bixiyey lacag dhan Sh. SO. 1.215 kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO ARKAY: Dhulka la weydiistay, kuna faahiya mq. 810 loona tiriyey Cabdullaahi Maxamuud Xasan sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda farsamada dhulka Verbale di consegna taariikhduna ahayd 10 Dis. 1975;

ISACOO AKKAY: Warqadda ku qiran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaamayso dhulka isaga ah;

ISAGOO ARKAY: Xaqiijintii farsamada ka tirsan Ku simaha Agaasimaha Hawlaha Guud ee Gobolka jubbada Hoose, Kismaayo, taariikhdeeduna ahayd 2.3.1976 taas oo caddaynesa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Wasaaradda Mawlaha Guud waaxda farsamada dhulka taatiikhdeeduna ahayd 1.9.1974 laguna xaqiijiyey sida ay naqshadda gurigu waafaqsan tahay;

ISAGOO ARKAY: Oggolaanta (Nulla Osta) degganaashada guriga ku dhisan Degmada Kismaayo laguna siiyey xaashida Lam. 1.3.HGX.1976, ee 1.3.1976, ee Dawladda Hoose ee Kismaayo;



X E E R

Waxaa dhul Dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Cabdullaahi Maxamuud Xasan dhul ku fadhiya mq. 810 kuna yaal degmada Kismaayo.

Muqdisho, 18.9.1976.

XOGHAYAHA

Wasaaradda Hawlaha Guud

*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY**
**Diiwaanka Lam. 1 Bogga Lam. 26**
**Muqdisho, 11 OTT 1976.**
**Hantidhawrka Guud**
**G/Sare Cabdullaahi Maxamuud Xasan**

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 14 Nof 1976 Ansaxid kala gadasho Daar laba Dabaq ah, kuna taal Magaalada Marka Gobolka Shabeelada Hoose, oo ay gadatay Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta kuna fadhiya mq. 1688,10 L. 9

WASAARAADDA HAWLAHA GUUD

AWAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

ANNAGOO ARAGNAY: Warqaddii 1aad iyo tii labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciyada Lam. yihiin 17.18,19 soo baxday 1..7.1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ANNAGOO ARAGNAY: Xeerka sharciga dhulka lam. 41 soona baxay 13kii Set. 1973;

ANNAGOO ARAGNAY: Qoraal Xeer Dawladeed 1.189 Rep. taariikhdu markay ahayd 20.12.1954 laguna qoray faafinta rasmiga ah ee J.D.S. lam. 3 ee 1 Maarso 1955, taas oo lagu aqoonsaday Jaalle Antonini Falcune Cad dhul ay ujeeddadiisu tahay dhis Dekereeto di libera Disponibilità) kuna yaal Magaalada Marka;

ANNAGOO ARAGNAY: Qoraal (Atto) Lam. 9978 Reb. 26.2.1968 lagu diiwaan geliyey Xamar 6.3.1968 al N. 208 Atti Pubblici Vol. 18 oo ah caddaynta Nootaayada Micheal J. Mariano taas oo Antonino Falcone, oo u ah wakiil falcone Carmelo wuxuu ka gaday kuna wareejiyey Cabdullaahi Sheeikh Cusmaan (Boggetto) wax allaale wixii ququuq ah oo ku saabsan dhismaha ku yaalay cadka dhulka ah kuna fadhiya mq. 1688,10 kuna yaal magaalada Marka;

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda qaymeynta Lam. WHG 3.1.-74 892 ee taariikhdu tahay 7 Maarso 1974, kuna soo baxday Wasaaradda Hawlaha Guuda Waaxda Qirshaynta iyo Hindisaha

ANNAGGOO ARAGNAY: Warqadda Lam. 111.201-0403154 ee Wasaaradda Maaliyadda, oo taariikhdeedu tahay 29.7.1976;

ANNAGOO ARAGNAY: Heshiiska kala gagashada Lam. 8349 Reb. ee 16kii Oktoobar 1976, qiimaheeduna yahay Sh. SO. 146.000 oo uu qoray Notaayada Dr. Muuse Xuseen Saadiq ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ay ku gadatay Darta labada dabaq ah;



X E E R

Waxaa la ansixiyey heshiiska kala gadasha Lam. 8349 Reb. ee 16 Oktoobar 1976, oo uuqoray Nootaayada kor ku sheegan, ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ay uga gadatay Jaalle Cabdulqaadir Sheekh Cusmaan, Daarta labada dabaq ah, qiimaheeduna yahay Sh. SO. 146.000 (Boqol iyo afartan iyo lix kun) 146.000 ah kuna yaal magaalada Marka Gobolka Shabeelada Hoose.

Wixii aan dekereetada ku caddayn waxaa loo raacayaa sida sharcigu qabo.

Muqdisho, 14.11.1976.

Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud

*Jaalle Maxamed Xawaadle Madar*

XOGHAYAHA

Wasiirka Wasaaradda Gar. iyo Arri. Diinta

*(Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen)*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY**
**Diiwaanka Lam. 1 Bogga Lam. 27**
**Muqdisho, 30 Nof, 1976.**
**Hantidhawrka Guud**

**G/Sare Cabdullaahi Rarsame Nuur.**

XEE WASARADDA HAWLAHA GUDD ee 9.12.76, Dhul dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey Jaallayaasha Cali Aadan Xasan iyo Daahir Xaaji Maxamed ku yaal Muqdisho Xaafadda Hodan kuna fadhiya mq. 364,50

WASAARAADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

ISAGOO ARKAY: Warqaddii 1aad iyo tii 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lam. yihiin 17,18,19 soo baxday 1.-Luulyo 1976, oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la Wareegtay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Sharciga dhulka lam. 41 soona baxay 13kii Settembre 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer lam. 6 soona baxday 9 Jannaayo 1967;

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu keensaday Cali Aadan Xasan iyo Daahir Xaaji Maxamed taariikhdu markay ahayd 23.9.1975, kuna weydiisteen dhismo, cad dhul Dawladeed, ku yaal Muqdisho Xaafadda Hodan Jidka Kacaanka kuna dhacaaya 'Qaybta VII'

ISAGOO ARKAY: Naadada dhulka, kuna saabsàn cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhejiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, lam. L.3 R.10 soona baxday 28 Oktoobar 1976 iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda Lam. 35 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horey u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dawladda Hoose ee Muqdisho fadhigoodii 13.5.1976 taariikhdeeduna ahayd 13.5.1976, kuna saabsanayd dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lam. 243682 ee 10.6.1976, kana soo baxday Fafiiska canshuuraha Dadban, taas oo caddaynaysa in Cali Aadan Xasan iyo Daahir Xaaji Maxamed ay bixiyeen lacag dhan Sh. SO. 364,50 kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO ARKAY: Warqadda hubsashada dhulka ee W.H.G. taariikhdeeduna ahayd 25.9.1975,

ISAGOO ARKAY: Dhul la weydiistay, kuna fadhiya mq. 364,50 loona tiriyey Cali Aadan Xasan iyo Daahir Xaaji Maxamed sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda farsamdaa dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 12.6.1976.

ISAGOO ARKAY: Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameysa dhulka isaga ah;



ISAGOO ARKAY: Xaqiijinta Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo dhulka, taariikhdeeduna ahayd 1.9.1976 taas oo caddeynaysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha ee Dawladda Hoose ee Xamar lam. 35 ee 5.1.76, lagunahaqiijiyey sida ay naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGOO ARKAY: Oggolaashaha (Nulla Osta) degganaashaha guriga ku dhisan Xamar Xaafadda Hodan, Jidka Kacaanka laguna siiyey xaashida lam. 2921 ee 2 Agoosto 1976 oo Dawladda Hoose ee Xamar, in naqshaddu guriga waafaqsan tahay;

ISAGOO ARKAY: In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsan siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dawladeed Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadadiisu ahayd dhis, wuxuu soo saarayaa.

XEER

Waxaa dhul dawladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonsaday Cali Aadan Xasan iyo Daahir Xaaji Maxamed, dhul ku fadhiya mq. 364'50 kuna yaal Muqdisho Xaafadda Hodan Jidka Kacaaska.

Muqdisho, 9. Dic. 1976,

WASIIRKA

Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY**
**Diiwaanka Lam. 1 bogga lam. 28**
**Muqdisho, 21 Dic. 1976**
**Ku xigeenka Hantidhawraha Guud**
**Jaalle Yuusuf Cali Nuur.**

## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maxamed Cabdullaahi Maxamed. uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 6.11.76. gabal dhul Dawladee ah oo ku yaal degmada Wardhiigley. qaabkiisuna yahay Retangolare addimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya 600 mdh soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Wadda 21 Oktoobar.

Koonfur waxaa ka xiga: Loot. Lam. 036.

Galbeed waxaa ka xiga: Loot Lam. 027.

Bari waxaa ka xiga: Loot. Lam. 025.

Qofkii danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddan) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiiska ee Dawladda Hoose Waaxda FFarsamada dhulka.

Muqdisho, 20.11.76.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 5



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Seynab Maxamed Yeberow uu ku soo weydiistay arjigii taariikhdiisu ahayo 16.11.76. gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal degmada Wardhiiley qaabkiisuna yahay rettangolare addimihiisuna yihiin 20x30. kuna fadhiya 600 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: G. Lam. 025.

Koonfur waxaa ka xiga: Wadada 30ka.

Galbeed waxaa ka xiga L. Lam 034

Bari waxaa ka xiga: L. lam. 036

Qofkii danayna dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejyio looxa ogeysiisyada eeDawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqdisho, 22.11.76.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 6

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Aamina Aadan Nuur. uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 1.11.76. gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal degmada Wardhiigley qaabkiisuna wahay Rettangolare addimihiisu yihiin kuna fadhiya mdh. soohdimiisusa yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga Waddd lot las. 035,

Koonfur waxaa ka xiga: lot. lam 035

Galbeed waxaa ka xiga: lot. lam. 025

Bari waxaa ka xiga: lot lam. 026

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafin-Rasmiga ah; laguna dhejiyo ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada dhulka.

Muqdisho, 22.11.76,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jaalle Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 7



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D O D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Ibraahim Maxamuud Maxamed iyo Faarax Ciise Cabdulle. uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 13.11.76. gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal degmada qaabkiisuna yahay Resttangolare addimihiisuna yihiin 364,50 kuna fadhiya mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Wayooyi waxaa ka xiga Xaashi Warsame Cali.

Koonfur waxaa ka Jid

Galbeed waxaa ka xiga Jid.

Bari waxaa ka xiga Waddada Shariif Calawi.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddi ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee dawladda Hoose Waaxda farsamada dhulka.

Muqdisho, 22.11.76,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jaalle Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 8

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Awliyo Maxamed Xersi. uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 16.8.1976. gabal dhul dawladeed oo ku yaal degmada Wadajir. qaabkiisuna yahay Afar Gees adoimihiisu yihiin 100x100 kuna fadhiya 1000 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul Dawladeed.

Koonfur waxaa ka xiga: Xeebta Badda.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga. dhul Dawladeed.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada dhulka.

Muqdisho, 22.11.1976.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 9



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Xirsiya Seeraar Yuusuf. oo ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 20.9 1976. gabal dhul dawladeed ah oo yaal degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisu yihiin 13,50x 13,50 kuna fadhiya 182,25 mdh. soosdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada 30ka.

Koonfur waxaa ka xiga : Cabdullaahi Colaad Siyaad.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada 26ka Juun.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka ee taal Waaxda dhismaha iyo ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oolaga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada dhulka.

Muqdisho, 28.11.76.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 10

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddaysayaa in Jaalle Axmed Maxamed Abiikar. uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayc 20.8.1962 gabal dhul Dawladeed ah ku yaal degmada qaabkiisu yahay Rettangolare addimihiisu yihiin 2,700 kuna fadhiya 45x60 mdh. soohaimihiisuna yihiin sida hooe ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qifkii danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyey looxa ogeysiiska ee Dawladda Hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqdisho, 19. Dis 1976,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 11



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdulle Wagad Shiil uu ka soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 28.11.76 gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmada Boondhere qaabkiisuna yahay Rettangolar addimihiisu yihiin 12x12 kuna fadhiya 144,00 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga: Jaalle Cali Ulusow.

Koofur waxaa ku xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Maxamuud Haayow.

Bari waxaa ku xiga: Jid.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaanalaga doodi karaa muddo ku siman 30(soddon) maalmood oo laga billaabo maalinat lagu soo daabaco buugga faafinta rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dowladda hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqdisho. 19Dic. 1976.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 12

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Weheliye Siyaad uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 5.11.76 gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmada Haw-Wadaag qaabkiisuna yahay Rettangolar addimihiisu yihiin 13,50x13,50 kuna fadhiya 182.25 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koofur waxaa ka xiga: Maxamuud Nuur.

Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Moxiddin.

Bari waxaa ka xiga: Munye Saciid.

Qofkii daneynayaa dhulkaas wuxuu sifiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taalWaaxda dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30(soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga faafinta rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiiyada ee Dowlada hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqdisho, 19Dic 1976.

**Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka**

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka





WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Caasha Cali Maxamed uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 18.1.76, gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Hawl Wadaag qaabkiisuna yahay rettangolare addimihiisu yihiin 25x13,50 kuna fadhiya mdh. 364.50 soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Cusmaan.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii danaynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqnaqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Waxaasa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiiska ee dawladda hoose Waaxda Farsamada dhulka.

Muqdisho, 19 Dis. 1976,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Xasan Xersi Muuse. uu ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 5.11.1976. gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Hawl-Wadaag. qaabkiisuna yahay Rettangolar addimihiisu yihiin 27x13,50 kuna fadhiya 364.50 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jaalle Maxamed Cabdulle Jimcaale

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Ibraahim Cali.

Bari waxaa ka xiga Xasan Xersi Muuse.

Qofkii danynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiiska ee Dawladda Hoose Waaxda tFarsamada dhulka.

Muqdisho, 19. Dis. 1976,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 15



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Aadan Sibriye uu ku soo weeydiisay arjiga taariikhdiisu ahayd 8.12.76 gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Hodon qaabkiisuna yahay Rettangolar addimihiisu yihiin 30x30 kuna fadhiya 90 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Jaalle Cali yare

Galbeed waxaa ku xiga: Dhul aad leeyahay.

Bari waxaa ku xiga: Maxamed Aadan dhulkiisii hore.

Qifkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30(soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga faafinta rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dowladda hoose Waaxda Farsamada Dhulka.

Muqdisho, 19Dic. 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Caydaruus Cusmaan Keenedid)*

L.16

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D O D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Sheekh Yuusuf Faarax Cabdulle. uua ku soo weydiistay arjiga taariikhdiisu ahayd 2.5.1968. gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal degmada Villaaggio Xaaji Ragib. qaabkiisuna yahay Afar gees isle'eg addimihiisu yihiin 144 ku fadhiya mdh. 12x12 soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:.

Waqooyi waxaa ka xiga: jid.
Koonfur waxaa ka xiga: Faarax Wacays.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Cabdullaahi Sheekh.

Qafkii danaynaaya dhulkaas wuxuu s fiican uga arki karaa naqshadda Dhulka oo taal Waaxda dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Waxaana laga doodi karaa muddi ku siman 30 (soddon) maalmood oo laga billaabo maalinta lagu soo daabaco buugga Faafinta Rasmiga ah; laguna soo dhejiyo looxa ogeysiisyada ee Dawladda Hoose Waaxda Farcamadadhulka.

Muqdisho, 19. Dis. 1976,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 17



## WSAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Cali Jumcaale maalintii 12.9.62 loona ogolaadaay oo ku yiil Muqdisho degmada V/Noorad. qaabkiisuna ahaa Rettangolar addimihiisuna ahaayeen 40x60 kuna fadhiye 2400mdh. looga qaaday danta guud looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Wadajir Jidka sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda Lambarkeedu ahaa 549600 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday dana guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Wadajir Jidka qaabkiisuna Rettangilare addimihiisu yihiin 40x60 kuna fadhiya 2400mdh. soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran.

Waqooyi waxaa ku xiga: Dhul Dad Leeyahay.

Koofur waxaa ku xiga: Dhul Dad Leeyahay.

Galbeed waxaa ku xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Muqdsho, 14.12.1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 18

WSAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddaynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xuseen Cilmi Hiraabe. maalintii 27.4.68. loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Wadajir. qaabkiisuna ahaa Rettangolar, addimihiisuna ahaayeen 60x50 kuna faahiya 300 mdh. looga qaaday danta Guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Wadajir Jidka Xalane. sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 117.165 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka looga beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada 21 Oktoobar Jidka 21 Oktoobar qaabkiisuna waa Rettangolaar addimihiisu yihiin 60x40 kuna fadhiya 2400 mdh. soohdimihiisuna waa sida hoos wu qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: dhul Lam. 0,37, 0,38.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 0,29 iyo 39

B a r i waxaa ka xiga dhul Lam. 0,26 36,

Muqdisho, 4.7.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 19



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

BEDDELAAD NAADO DHUL

in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Faa- 20.7.1976. loona oggolaaday oo ku yiil qaabkiisuna ahaa Rettangolar. addimihii- fadhiya 3000 mdh. looga qaaday dan guud, kale ku yaal Muqdisho, degmada Wadajir. hore loogu soo diray warqadda lam- o. oo ka baxday xafiiskaan waxay isu bed-

beddelay ga qaaday danta guud, wuxuu gmada Jidka 21 Oktoobar. qaab- yihiin 30x20 kuna fadhiya 600

Waqooyi waxaa ka xiga Loot. L. 436.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Loot. L. 443.

Bari waxaa ka xiga Loot. L. 445.

Muqdisho, 4.1.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Jaalle Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 20

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay yo igeysiiska Bankiga

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 No. 2, iyo lumidda jeegga wareega lam. 11239 ee Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta koowaad, kuna qornayd 3834 Sh. SO.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo jeegga wareega kaddib markii ay ka soo wareegto muddo 15 maalmood ah; maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Xasan Axmed Nuur ama qof ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 15ka maalmood ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 11.1.1977,

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Banaadir
*Jaalle Cabdirisaaq Geelle Yuusuf*

*L. 21*



MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyi ogeysiinta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 65 N. 2 iyo Lumidda jeegga wareega lam. 8862 ee Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta saddexaad, kuna qorneed Sh. SO. 2.114 (Laba kun boqol iyo toban afar)

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo jeegga wareega kaddib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Maxamed Cali Saciid ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 11.1.1977.

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Banaadir
*Jaalle Cabdirisaaq Geelle Yuusuf*

L. 22

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY waxay ku saabsan ahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 No.2; iyo lumidda buugga kaydka L. 10551 di Sh. So. 2.348 bankiga Ganacsiga.

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo buugga kaydka kaddib markii ayka soo wareegto 30 maalmeeood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### WUXUU AMRAYAA

In buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Colow Geedi Maxamed ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo laga sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan soo sheegnay.

Muqdisho, 15.1.1977,

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Ganaadir

*Jaalle Cabdirisaaq Geelle Yuusuf*

L. 23



## MAXKAMADDA GOBOLKA HIIRAAN

Maxkamaddu markay aragtay arjigii uu soo qirtay Jaalle Xaaji Maxamed Cabdalla taariikhdu maraya ahayd 18.12.1976, arjigaas ee ku saabsanaa ogeysiis in uu lumay jeeg wareega lam. 24317 5.10.1976, lacagtiisuna ahayd Sh. So. 5.000 (Shankun)

Maxkamaddu marka aragtay warqadda ka soo baxday Bankiga Ganacsiga Ummadda laanta Beledweyne in jeeggaas aan kor su soo sheegnay uu ka lumay ninkaas uuna run sheegaayo, iyaga oo tixraacasaabsanaa ogeysiis in uu lumay jeeg wareega lam. 24317 taariikh markay ahayd 5.10.1976, lacagtiisuna ahayd Sh. So. 5000 (Shankun)

Maxkamaddu markay aragtay Qodobka 69 D.L. 9.9.65 N.2; waxay codsanayaan in loo sameeyo jeeggaas beddelkiisa Jaalle Xaaji Maxamed Cabdalla muddo 20 (labaatan maalmood ka billaabata maalinta lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ah (Bollettino Ufficiale), waana in gacanta loo saaro Jaalle Xaaji Maxamed Cabdalla)

Beledweyna 19.12.1976,

KAALIYAHA MAXKAMADDA

*(Jaalle Cali Maxamed Maxamuud)*

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka

*Dr. Cabdullaahi Cali Xasan*

*23/Bis*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor kuqoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: Qodobka 69 D.L. 9.9.65 No. 2; lumidda buugga lam. 8101 ay ku qoran tahay Sh. So. 16.580.

WUXUU AMRAYAA

IN loo cusboonaysiiyo buugga kaydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Maxamuud Maxamed Xasan ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo 30 maalmood oo ah sida aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 22.1.1977,

Guddoomooiyaha aMxkamadda G. Banaadir

*Jaalle Dr. Cabdirisaaq Geele Yuusuf*

*L. 23/Bis*